



## Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

### **WAR-SAXAAFADEED 003/2010**

#### **Ergeygga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud oo Dawladda Soomaaliya ku bogaadiyey sannadguuraddeedii kowaad**

Nayroobi, 12 Febraayo 2010 – Ergeygga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Soomaliya, Ahmedou Ould-Abdallah, ayaa ku bogaadiyey Dawladda Soomaaliya sannadguuraddeedii kowaad, wuxuuna ugu baaqay inay sii waddo dadaallada ay ugu jirto si ay nabad iyo xasillooni dalka ugu soo celiso.

“Madaxweynaha, Afhayeenkha Barlamaanka, Raiisal Wasaaraha, Wasiirrada iyo Xildhibaannada baarlamaanku waxay tallaabooyin muhim ah hore u qaadeen 12kii bilood ee la soo dhaafay, kuwaas oo aan aniga indhahayga ku soo arkay markii aan booqday magaalada Muqdisho”, ayuu yiri Md. Ould-Abdallah. “Waxaa nasiib darro ah inay waqtii iyo hantiba ku bixiyeen iyaga oo isku dayaya inay joojiyaan weerarrada ay soo qadaayaan kooxaha xagjirka ah oo ka soo horjeeda dhammaan dadaallada ay ugu jiraan inay dalka xasillooni ku soo celiyaan.”

Wuxuu sheegay inay Dawladdu sameysay horumar la arki karo tan iyo markii ay degtay magaalada Muqdisho bishii Febraayo ee sannadkii la soo dhaafey, wxaana ka mid ah shaqada laga qabtay Dekadda, Gegida diyaaradaha, balamaanka, Masaajidka Isbahaysiga, iwm. Wuxuu si gaar ah u tilmaamay in dawladdu iyadoo aan kaalmo weyn ka helin bulshada caalamka ay dayactirtay Radio Moqdisho oo hadda 18 saacadood maalintiba warbaahintiisa u sii tebnaya dhegeysteyaa aad u badan oo xiisebynaya warbaahintaas.

“Dad badan waxay hadda garowsanayaan in Soomaaliya ay ka sii guureyso xaaladdii ahayd dawlad fashilantay oo dagaal ku jirta ayna u sii durkeyso xaaladda ah dawlad liidata oo u baahan dib u dhis iyo horumar baahsan. Dadaalada la wado ee ku wajahan soo celinta nabadda waa inaysan ku ekaan amaanka, arrimmaha siyaasadda ama bani'aadanimada oo kaliya, balse waxaa kaloo loo bahanyahay in la sameeyo horumar dhaqaale, gaar ahaan shaqo abuuris iyo kobcinta ganacsiga iyo dhaqaalaha.”

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilسان isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (Nayroobi, Kenya)

Tel. +254 733902020 ama +254 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website): [www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)



## **Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)**

Wuxuu ammaanay dalaka u soo gurmaday Soomaaliya, gaar ahaan kuwa si toos ah gargaar u gaarsiiyey dowladda, iyo dalalka gobalka – Urur goboleedka IGAD iyo Midowga Afrika oo ah “kuwa geystay kaalmada ugu badan oo haddana ah kuwa ay saameyn ta dhibaatada ugu badan ay soo gaareyso.” Wuxuu sheegay inuu rajeynayo in bulshada caalamku ay muujin doonto dabacsanaan cusub si loo xaqijiyo inay dowladdu sii waddo horumarka.

“Run ahaantii, sannad ma aha waqtii ku filan si loo joojiyo xadgudubyada badan ee xaquuqda aadanaha ee aan ka xumahay inay weli sii socdaan”, ayuu yiri Ould-Abdallah.” “Kuwa ka soo horjeeda dowaladda waxay weerareen arday, dumar iyo shaqaalaha gargaarka. Dagaalladuna waxay keeneen barakac sii socda iyo ka ganacsiga dadka.” Hase ahaatee, waxaan u baahanahay in aan aqoonsano talaabooyinka horumarka le ee la qaaday.

“Waxaa kale oo aan jeclahay inaan tilmaamo in bulshada ganacsatada iyo kooxo kale ay wax weyn ku kordhiyeen nabadeynta iyo deganaashaha dalkooda. Arrintan waa in la dhiirigeliya lana sii ballaariyaa.”

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilسان isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda

Soomaaliya (Nayroobi, Kenya)

Tel. +254 733902020 ama +254 737400133

Fadlan eeg rugta Internet-ka (website): [www.unpos.unmission.org](http://www.unpos.unmission.org)